

JAWAABAHA SU'AALAHA CAADIGA

AH EE XASHIISHKA

Maajo 21, 2015

Deegaano badan oo Colorado iyo martida waxay ka qabaan su'aalo xashiishka tafaariiqda. Isticmaal warbixintaan si aad uga jawaabtid su'aalaha caadiga qaarkood iyo si aad u caawisid bilowga wada sheekeysiga.

CAAFIMAADKAAGA IYO BADBAADADA

Badeecada dabiiciga ah waxay noqon kartaa halis ama sun.

Xashiishka, sida dhirta kale sida tubaakada iyo miraha sunta, dadka way waxyeleen karaan. Kiimikada xashiiska ku jira oo ku darensiiyo "marqaanka," tetrahydrocannabinol (THC) waxay lahaan kartaa saameyn xun oo maskaxda, oo ay ku jiraan dhibaatooyinka xasuusta oo socoto ilaa isbuuc ama halista xanuunada, sida malaawaalka ama shakiga badan oo isla markaas isticmaalka ka dib ah.

Sharciiga micnaheeda ma ahan badbaado.

Ka faker qamriga ama sigaarka. Labadaba waa sharci isticmaalkooda, laakin waxaa jiro haliso. Xashiishka sidoo kale wuxuu leeyahay haliso xitaa inkastoo hadeer uu u sharciyeysanyahay dadka 21 sanno jiro iyo ka weyn. Sharciyeysnaanta maka dhigto xashiishka badbaado.

Daawooyin badan, oo ay ku jiraan daawooyinka xashiishka, waxaa laga yabaa in ay leeyihiin saameyno dhinaca.

Dhaqaatiirta waxay ku talin karaan caafimaadka xashiishka oo dacwado gaar ah goortii ay go'aansadaan faa'idooyinka ee ka weyn halisaha saameynada dhinaca. Kala hadal dhaqtarkaaga dooqyada daaweynta ee leh halisaha ugu hooseeya.

Qiiq waa qiiq

Neefsiga uun walbo wuu u daranyahay caafimaadkaaga, hadii uunka ka yimaado geedo shidan, tubaako ama xashiish. Cabida xashiish wuxuu leeyahay kiimiko isku mid ah sida cabida tubaakada ah. Qaar ka mid ah kiimikooyinka waxay sababi karaan kansar.

Gaari kaxeeynta adigoo marqaansan waxay kordhisaa halista shilka.

Waa sharci daro in lagu ka xeeyo adigoo xashiish cabsan. Xashiishka wuxuu ka dhigaa gaari kaxeeynta halis aad ah sababtoo ah wuxuu yareeyaa waqtiga fal celintaada iyo ku adkeeyaa in aad sheegtid masaafada iyo waqtiga. Sug ugu yaraan 6 saacadood markaad cabtid kadib ama ugu yaraan 8 saacadood markaad cuntid ama cabtid xashiish inta aadan gaari ka xeynin, baskiil wadista, ama sameynta hawlaha kale ee badbaadada xasaasiga.

La jiiday, la cunay ama la cabay – THC weli waa THC.

Inkastoo cabida xashiishka leeyahay halisaha dheeraadka ah ee waxyeelada saameynta cabida, iyadoo la isticmaalayo isku darka cuntada xashiishka ama uumiyaha weli wuu ku saameyn karaa THC. Wixii warbixin dheeraad ah oo halishaa caafimaadka THC, booqo Colorado.gov/Marijuana.

Dheelitirka kiimikada dabiiciga ee jirkaaga ku jiro ayuu jahwareerin karaa THC.

Iyadoo kiimikada qaarkood ay ku jiraan dibiici ahaan jirka iyo caanaha naaska si ay u caawiyaan shaqada unugyada dareemaha, kiimikada xashiishka, THC, aad ayay uga xoogantahay. THC way jahwareerin kartaa dheelitirka dabiiciga ah ee jirkaaga iyo waxay ka dhigtaa mid ku adag unugyada dareemahaaga in ay caadi u shaqeeyaan. Tani waxay u darantahay dhalinyarada iyo uurleyda ama naagaha naaska nuujiyo.

GURIGAAGA IYO QOYSKA

Ku keydi meel badbaado ka ah dhalinyarada.

Carruurta yar laga yaabo in ay ku jahwareeraan badeecada xashiishka oo cuntada joogtada ah ma nanaca. Hubi in dhammaan badeecada xashiishka lagu ilaaliyo weelka carruurta aysan furi karin, oo si cad u calaameysan iyo u xiran. Dhalinyarada laga yaabo in ay galaan sheeyada aad u maleyso in ay badbaado tahay.

Xili hore kala hadal iyo badanaaaba dhalinyarada xashiishka.

Keyd badbaado ah marwalbo kuma filno. Lalahow sheeko furan dhalinyarada oo ku saabsan halisaha hormarka maskaxdooda. Wadajir ku dajiya sharciyo guriga oo cad.

Naagaha uurka ama naaska nuujinayo waa in aysan isticmaalin xashiishka.

Waxaa jiro daawooyinka qaarkood iyo cuntooyinka, sida qadada hilibka ama sushi, oo naagaha uurka ama naaska nuujiya aheyd in ay ka hortagaan waxyeelada canugooda. Tani sidoo kale run ayay u tahay xashiishka.

Xashiishka uma ahan daaweyn badbaado ah lalabada xiliga uurka lagu jiro.

THC-ga ku jiro xashiishka wuxuu u maraa canuga mandhiciirka. tani waxaa laga yaabaa in ay ku adkeyso canuga in uu fiiro gaar ah lahaado iyo barto, gaar ahaan markay korayaan. Naagta uurka ah waa in ay kala hadlaan dhaqtarkooda dooqyada badbaadada ah oo lagu daaweeyo lalabada oo aan halis galineynin canuga.

Deegaanka sigaarka aan lagu cabin ayaa badbaado u ah qoyskaaga.

Neefsiga sigaar walba caafimaadkaaga ayuu u daranyahay. Ha u ogolaanin in gurigaada lagu cabo ama agagaarka qoyskaaga.

Xashiiska aad ayuu u xanuunsiin karaa carruurta. Dhibaato ayuu raadiyaa oo socod ah ama fadhiya, wuxuu bilaabayaa hurdo ama neefsiga ku adkaaneysaa.

Hadii aad walaacsantahay, u yeer qadka xakameynta sunta sida ugu dhaqsiiha badan oo suurtagalka ah. Wicitaanka waa bilaash iyo si dhaqso ah ayaa lagu caawinayaa: **1-800-222-1222**.

Hadii xanuuno ay daranyihiin, soo wac 911 ama booqo qolka xaaladaha degdega.

U AHOW KU DAYASHO U WANAAGSAN CAR- RUURTA.

Deji tusaale wanaagsan iyo aasaas deegaan badbaado ah.

Talaabooyinka ayaa ka dhawaq dheer erayada. Ha isticmaalin xashiish, qamri ama maandooriyaha kale ee carruurta ka ag dhaw.



COLORADO
Department of Public
Health & Environment